Tilmaan iyo talobixin
Baranbarada iyo quraanjada (macaan-jecel)

# Wax muhiim ah in la sameeyo iyo la garto marka nadaafad fayadhar la samaynayo

**Si loo helo natiijada ugu wanaagsan waxa muhiim ah in aad tilmaamahayaga u raacdo si taxadir leh. Haddii kale waxanu u baahan karnaa in aannu hakinno fayadhawrka oo aannu la xiriirno shirkadda guriga leh si tallaabooyin dheeri ah loo sameeyo.**


## Wax muhiim in la sameeyo ka hor nadaafadda fayadhawrka




Waxanu u baahannay in aannu meel kasta galno si aannu u baarno.



Huufar mari dhulka, dildillaacyada, daloollada iyo xiitaa qalabka kijada. Ku masax dhulka dawada nadaafadda.



Huufarinta ka dib, waxad kiishka huufarka ku riddaa bac oo tallaagadda geli.




Xagg dambe iyo xagga hoose ee mikrooda, shooladda, iyo qaboojisada, nadiifi iyo weliba gudaha armaajada iyo khaanadaha.



Dhaq weelka iyo wiciyadda oo ku gur armaajooyinka iyo khaanadaha.



Wixii cunto ah ku xafid qasacado dabool leh. Qub ama dabool cuntada xayawaanka, marka ay cunaan ka dib.



Cuntooyinka ay cayayaanku dhexgaleen ku gur bac oo geli tallaagadda. Sug ugu yaraan toddoba cisho, dabadeed soo saar bacda oo ku tuur qashin-qubka caadiga ah.




Dabool ku xafid qashinka guriga iyo xashiishka beerta.



Nadiifi godka bullaacadda xamaamka, berkedda lagu mayrtana si xeeldheer u nadiifi.

Somali



## Xilliga safaynta

### Xilliga sifaynta wadata dabianada

Caadi ahaan sifaynta wadata dabinnada ayaa la sameeyaa oo markaasi waxaad meelaha guriga ka mid ah u isticmaali kartaa si caadi ah isla markiiba ka dib sifaynta.

### Sifaynta wadata alaab dareere ama budo ah

Haddii taas ka soo horjeedkeeda aanu anagu u baahano inaanu isticmaalno walxo dareere ah ama alaab ah qaab budo ah markaasi farsamo yaqaanka cayayaanka ayaa ku wargelin doona arintan oo ku siin doona tilmaamo gaar ah:

- Ha joogin meelaha la sifeeyay ilaa laba saacadood. Waa caadi in la joogo qolalka ku xiga.
- Marka alaabta aanu wax ku sifaynay ay qalasho (waxay qaadan kartaa ilaa 24 saacadood) markaas ayaa meelihi la sifeeyay dib loo isticmaali karaa. Wixi alaab ah ee laga qaaday ayaa dib loogu soo celin karaa.
- Dadka aadka u ah xaasaasiga u ah ee tusaale ahaan leh xiiqda/ xasaasiyad, caruurta ka yar laba sanno, haweenka uurka leh iyo xayawaanka guriga lagu rabaysto waa inay iska ilaaliyaan inay wakhtiyo dheer joogaan qolalka laga shaqeeyay ilaa iyo inta ay wax ur ahi ku sii harsantahay.
- Meelaha la sifeeyay maaha in la nadiifiyo ama qoyaan lagu qalajiyo ilaa iyo shan toddobaad. Walxaha sifaynta waa inay ku sii harsanaadaan si ay wax uga qabaan cayayaanka yimaada meelahan laga shaqeeyay.



## Guud ahaan

- Marnaba maaha inaad dhaqdo ama rarto dabinnada iyo walxaha la dagaalanka cayayaanka ee aanu dhignay. Kuwaas ayaa naga caawiya inaanu daraasad ku samayno meesha cayayaankani joogo iyo inta ay leegtahay siday meesha ugu baahsanyihiin.
- Ha isticmaalin walxo la dagaalama cayayaanka oo gaar kuu ah maadama ay taasi xadayn karto awooda ama ay gebi ahaanba xumayn karto hawshan sifeynta ee la bilaabay.




- Wixii Cunto ah, adiga ayaa wax ka qabanaya, adiga oo ku ridaya bac oo gelinaya tallaajadda (–18° C). U sug ugu yaraan toddoba cisho, dabadeed soo saar bacda oo ku tuur qashin-qubka caadiga ah.

### Ku saabsan fayadhwrka

Waxanu kaa caawinaynaa in aad xalliso dhibaatada baranbarada iyo quraanjada (macaan-jecel) sida ugu dhakhso badan ee suurtogal ah laakiin inkasta oo hababka casriga ahi saamayn fiican leeyihiin haddana waxay qaadan kartaa ilaa hal wiig inta ay natiijo keenayso.

Sidan ayuu u ekaadaa hawlgalku:

### Sahamin

Waanu baaraynaa oo dhigdhigaynaa laaca dabinka ah iyo kiimikada cayayaanka.

### Muddada fayadhowrka

Inta fayadhawrku socdo waxad ka heli kartaa meelaha la fahadhawray cayayaan bakhtiyey.

### Gabagabo

Immaka inay jiraan ma aha wax calaamado cayayaan ah. Haddii loo baahdo waxannu ballamin doonaa dib u booqasho si aannu u baarno oo/ama aannu ugu celinno qaybo ka mid ah fayadhawrkii.

Haddii aanad wada fahmin tilmaamahayagan, akhriso warbixinta fayadhawrka ee uu ku siiyey farsamayaqaankayagu ama la xiriir adeegga macaamiisha Anticimex.

Utg. 3 Formgivning och produktion: www.luxlucid.com